



## WAXBARASHADA ASAASIGA AH

### EE IS DHAXGALKA (IGU)

### - MAALGELIN MUSTAQBALKAAGA

**Ku xooji fursadahaaga shaqo waayo aragnimo xirfadeed iyo sanad dugsiyed hal meel lagu qorsheeyay**

Miyaad dooneysaa in aad isku wado shaqo iyo waxbarasho dugsi oo ku haboon qorshayaashaada mustaqbalka? Markaa 2 sano oo waxbarashada asaasiga ah ee is dhaxgalka (IGU) laga yaabee in ay ku anfaceyso.

**Waa inaad IGU qaadato maxaa yeelay:**

- waxaad dhamaynaysaa barnaamij tabobar oo kor u qaadaaya fursadahaaga aad ku bilaabayso barashada xirfad
- waxaad helaysaa khibrad shaqo iyo fursado ka fiican oo aad isku masruufeyso
- waxaad helaysaa lacagta fasaxa iyo xuquuqda aad u leedahay gunooyinka shaqo la'aanta (heerka dadka soo qalin-jabiyey)





## WARBIXIN KU SAABSAN IGU

**WAXBARASHADU (KOORSADU) WAXA AY QAADANAYSAA  
2 SANO OO WAXA AY KA KOOBAN TAHAY:**

### **Shaqada shirkadaha**

Waxa aad ka shaqeyneysaa shirkad 33-37 saacadood sitimaankiiba 2 sanadood oo ay ku jirto waxbarashada dugsigu. Halkan shaqooyinka kala duwan waxa lagaa siinayaa tababar dhamaystiran oo sidaa darteed u noqoneysa waayo aragnimo xirfad shaqo arjigaaga. Sidoo kale waxa aad ka helaysaa faham sida ay tahay maalinta goobaha suuqa shaqada iyo saaxiibo wanaagsan.

### **Waxbarashada dugsiga**

Waxaad inta 2 sano lagu jiro isku-geyn heli doontaa 23 toddobaad oo waxbarasho dugsi oo wakhti buuxa ah. Waxa tan loo kala qeybin karaa siyaabo kala duwan – tusaale ahaan 8 saacadood oo aad dugsi dhigato todobaadkiiba iyo 29 saacadood oo shaqo ah, ama 37 saacadood oo waxbarasho ah hal toddobaad iyo 37 saacadood shaqo ah toddobaadka kale.

Iyadoo lala kaashanaayo loo shaqeeyahaaga, aayaad abuuraysaan qorshe tabobar oo ay ku jiraan koorsooyin barnaamikaaga IGU

ku haboon, heerka luqaddaada Danishka iyo heerka waxbarashadaada. Waxay tani noqon kartaa casharo luqadda Danishka ah iyo koorsooyin xirfad aheeneedba.

### **Shahaado aad isticmaali kartid**

Marka aad dhameysatid wadar ahaan mudadii, waxa aad heleysaa shahaado ah in aad dhameys tirtay mudadii, taas oo aad mustaqbalka tusi kartid shaqo bixiyiyaasha.

### **Mushahar iyo xaquuq**

Markaad shaqaalaha tabobarka barnaamijkha IGU ku jira tahay ayaa lagu siin doonaa ugu yaraan EGU (heerka waxbarashada aasaasiiga ah ee tabobarka xirfada shaqada), waxaanad yeelan doontaa xuquuq la mid ah tan shaqaalaha caadiga ah ee shirkadda.

- heli karto xaq fasaxa
- aad heli karto qorshaha gunnada hawlgabka
- aad heli karto mudada ogeysiiska la isa siiyo haddii shaqada lagaa joojinayo

## Mushaarka inta aad ku jirto tabobarka shaqada

Intaad tabobarkaaga ku jirto, ayuu loo shaqeeyahaagu bixin doonaa mushaharka saacadaha aad ku shaqaysay shirkada. Wuxuu uu heerka mushaharku ku xiran yahay nooca shirkada ee aad ka shaqeyso. Isku celcelisku wuxuu u dhexeeya 10,000 – 12,000 DKK oo ay canshuurtu ku jirto.

## Dakhliga xilliga dugsiga la dhiganaayo

Waxaaad xaq u leedahay inaad hesho gunnada waxbarashada marka aad dugsi dhigato. Xilliga saacadaha aad dugsiga dhiganayso ayaanad wax mushahar ah shirkadda ka heli doonin.

Gunada waxbarashada ee 2024	
<b>Qof keligii aan caruur laheyn</b>	Qof keligii aan caruur laheyn DKK 7.118 bil walba canshuurta ka hor
<b>Xaas caruurna leh</b>	Xaas caruurna leh DKK 9.961 bil walba canshuurta ka hor
<b>Qof keligii ah oo caruurna leh</b>	Qof keligii ah oo caruurna leh DKK 14.232 bil walba canshuurta ka hor

## SHURUUDAHA GELTIAANKA:

### Si aad shaqaale IGU igu noqoto, waa in:

- aad tahay qof qaxooti ah ama xubnaha qoyska ee loo keenay/ dib ula soo midoobay ama sharciga deganaanshaha laguu siiyay sida waafaqsan xeerarkan gaarka ah ee soo socda:
  - Sharciga deggenaanshaha ee ku meel gaadhka ah ee loogu talogalay dadka tusaale ahaan dawladda Danmarka Afqaanistaan ku caawinaayay.
  - Sharciga deggenaanshaha ee ku meel gaadhka ah ee loogu talogalay dadka ka soo barakacay Ukraine
- Aad ugu yaraan 18 jir tahay kana yar tahay 50 jir
- Aad si sharci ah Danmark wax 20 sano ka yar ugu degganayd laga bilaabo maalintii kowaad ee barnaamijka IGU uu bilaabmaayo



# SIDAN AYAAD KU BILAABI KARTAA

Waxa aad heshiis kula gelii kartaa mudada IGU hey'ad dowli ah ama shirkad madax banaan iyada oo aan degmada iyo hey'adaha dowliga aan wax faro gelin ku laheyn.

## **Haddii aad tababar u joogtid shirkad ama mushaharka la kabo**

Haddii aad tabobar shaqo horeyba ugu jirtay ama mushaharka lagaa kabo, ayaa laga yaabaa inaad shaqaaleyn ta IGU ee isla shirkadaas sii wadan karto.

La hadal la taliyahaaga. Si wadajir ah ayaad ula xariiri kartaan xarunta shaqada (jobcenter) ee idinku dhow ama adeega shaqada Denmarka tlf: 72200350

(Jobcervise Denmark) oo waxa aad ka heli kartaan jawaab, sida aad isugu aadin laheydeen mudada IUG iyo saxiixa heshiiska.

## **Haddii aadan xiriir la laheyn shirkado**

Haddii aad rabto wax dheeraad ah in aad ka ogaato IGU oo aad rabtid in aad laxiriirtid shirkad, la xiriir xaruntaada shagada (dit jobcenter). Lyaga ayaa ku caawinaya.

Waxaad macluumaadka lagala xiriiraayo ka heli kartaa

**[info.jobnet.dk/mit-jobcenter](http://info.jobnet.dk/mit-jobcenter)**

Way ku caawin doonaan.

